# Somali Psalm 23

1) Rabbigu waa adhijirka i jira; waxba u baahan maayo. 2) Wuxuu i fad hiisiiyaa doog
qoyan dhexdiis, Oo wuxuu ii hoggaamiyaa bihaya deggan dhinacooda. 3) Naftayda wuu
soo celiyaa. Oo magiciisa aawadiis wuxuu igu hor kacaa waddooyinka xaqnimada. 4) In
kastoo aan ku dhex socdo dooxada hooska dhimashada, Sharna ka baqi maayo,
waayo, waad ila jirtaa, Ushaada iyo hangoolkaaga ayaa ii raaxeeya. 5)
Cadaawayaashayda hortooda waxaad iigu diyaarisaa miis, Oo saliid baad madaxayga
ku subagtaa, koobkayguna waa buux dhaafaa. 6) Hubaal cimrigayga oo dhan waxaa i
raaci doona wanaag iyo naxariis, Oo weligay guriga Rabbiga ayaan degganaan
doonaa.